Maaha Qofka Qaraabada xiriiriya midka marka la xiriiriyo uun Qaraabada xiriiriya, laakiin kan Qaraabada xiriiriyaa waa midka marka Qaraabadiisu goyso xiriiriya

Cabdulaahi Binu Camar Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiye waxaa laga wariyey in Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Maaha Qofka Qaraabada xiriiriya midka marka la xiriiriyo uun Qaraabada xiriiriya, laakiin kan Qaraabada xiriiriyaa waa midka marka Qaraabadiisu goyso xiriiriya".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay: In Qofka buuxiyey xiriirinta Qaraabada oo wanaajiyaa maahan Qofka ixsaanka ku bixiya ixsaan. Balse kan dhab ahaan u xiriiriya ee si buuxda Qaraabada u xiriiriya waa kan hadii Qaraabadu goyso xiriiriya, hadii ay xumeeyaana u ixsaan fala.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/3854